**WISCONSIN DEPARTMENT OF HEALTH SERVICES**
Division of Medicaid Services
F-02260ASO (10/2023)

**EBT**

# CODSIGA KAARKA QUEST MEELGAAR AH
## (TEMPORARY QUEST CARD REQUEST)

**TILMAAMO:** Buuxi foomka hoose oo ku soo celi xafiiska si loo go'aamiyo haddii aad heli karto kaarka QUEST oo meelgaar ah. Si fiican u buuxi oo isticmaal khad ah buluug ama madow.

**Qeybta 1:** Haddii aadan qof ahaan isugu muujin karin kiiska, fadlan calaamadi "Other (Qof kale)" oo buuxi meesha bannaan. Haddii aadan ahayn Codsadaha Koowaad ee kiiska, meesha laguu diyaarshay ku qor magaca Codsadaha Koowaad. Haddii aad waraaqaha ka qaadato xafiiska, uma baahnid in aad qorato cinwaan waraaqo. Haddii kale, qor cinwaankaaga waraaqaha ee hadda. Waxaa la hubsanayaa in kaarkaaga joogtada ah ee cusub laguugu soo diro cinwaan sax ah.

**Qeybta 2:** Isticmaal meesha hoose adigoo si kooban u sheegaya waxa ku dhacay kaarkaagii hore iyo/ama sababta aad ugu baahan tahay kaarka meelgaarka ah. Kaarka meelgaarka ah ee QUEST waxa lagu heli karaa oo keliya xaaladaha qaarkood. Tusaale ahaan, qof si degdeg ah dhawaan loogu oggolaaday manaafacaad ama qof kaarkiisii ka xumaaday, ka lumay, ama laga xaday oo aan sugi karin ilaa boostada loogu soo diro kaar kale oo si caadi ah loo isticmaali karo. Xaqu-yeelashada kaarka meel gaarka ah waxaa go'aaminaya xafiiska marka ay codsiga helaan.

**Qeybta 3:** Si taxadar leh u akhriso qoraalka hoose. Qorista xarfaha hore ee magacaaga ee meelaha bannaan waxay sheegeysaa inaad fahamtay siduu shaqeeyo kaarka meelgaarka ah ee QUEST, in aad raaceyso sharciyada kaarka QUEST, iyo in aad fahamtay waxa dhici doona haddii aadan raacin sharciyada kaarka QUEST. Haddii aadan ku qorin xarfaha magacaaga hal meel ama in ka badan meelaha bannaan, ma heli doontid kaar ah QUEST oo meelgaar ah.

**Qeybta 4:** Ha buuxin qeybta 4. Qeybtan waxaa buuxin doona shaqaalaha xafiiska.

| **Qeybta 1: Aqoonsi iyo Macluumaad** | |
|---|---|
| Magacaaga (Koowaad, Aabbaha, Awoowaha) | Lambarka Kiiska |

Kiiskan qof ahaan maxaad ka tahay?

- ☐ Codsadaha Koowaad
- ☐ Qaangaar Kale oo Guriga ku Hela Cuntada
- ☐ Soo-iibiyaha Alaabta
- ☐ Lacagbixiyaha Alaabta
- ☐ Wakiilka Shakhsiyeed
- ☐ Other (Qof kale): ______________________________

Magaca Qofka Koowaad ee Kiiska (haddii aadan ahayn qofka koowaad)

Waraaqahaaga xafiiska miyaad ka qaadataa?

- ☐ Haa – Haddii aad haa tiri, uma baahnid in aad qeybta hoose ku qorto cinwaan waraaqo
- ☐ Maya

Waa maxay cinwaankaagu? (Jidka, Magaalada, Gobolka, Lambarka Boostada Xaafadda ama ZIP)

**Qeybta 2: Sababta Codsiga Kaaka Meelgaarka ah**

Maxaad u codsaneysaa kaarka QUEST ee meelgaarka ah? Jawaabtaada, fadlan ku faahfaahi sababta aadan u sugi karin ilaa kaarka beddiilka ah laguugu soo diro cinwaanka gurigaaga si aad ugu hesho manaafacaadkaaga.

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

## Qeybta 3: Waxaad Qiraneyso

Fadlan ku qor xarfaha magacaaga xarriijinta qoraal kasta hortiisa si aad u xaqiijiso inaad fahamtay oo aad oggolaatay.

___________ Waxaan ahay qofka aan sheeganayo, oo macluumaadka ku qoran foomkan waa mid sax iyo run ah sida aan u ogahay.

___________ Waxa keliya oo aan kaarka meelgaarka ah ee QUEST u isticmaali karaa manaafacaadka FoodShare ee la ii oggolyahay.

___________ Si fiican ayaan u xafidanayaa kaarka meelgaarka ah ee QUEST iyo lambarrada shakhsiga ee sirta ii ah (PIN). Haddii qof kale ogaado lambarrada ama PIN keyga, si degdeg ah ayaan ugu soo sheegayaa Xafiiska Kaarka QUEST **1-877-415-5164** ama **711** (TTY) oo waxaan beddelayaa PIN.

___________ Wax kasta oo aan ku iibssado FoodShare iyo kaarka meelgaarka ah ee QUEST waxa loo tixgalin doonaa wax la oggolaaday oo *lama* beddeli doono haddii wixii lagu iibsaday ay ka dambeeyeen dadka soo socda: aniga; qof kale oo ku jira kiiskayga; qof in uu wax ii soo iibiyo idan u haysta; lacagbixiye ah dhinacayga; wakiilka shakhsiyeed; ama qof kasta oo aan anigu u dhiibto kaarka QUEST ee meelgaarka ah iyo PIN keyga.

___________ Kaarkan waa meelgaar oo wuxuu shaqeynayaa 30 maalmood ka dib ama ilaa inta aan ka shaqeysiinayo kaarka cusub ee QUEST iyo marka la i siiyo PIN, hadba kii soo horreeya.

___________ Haddii afar ama in ka badan oo ah kaarka QUEST la ii siiyo kiiskeyga ilaa 12 bilood, Gobolka ayaa si dhow u eegi kara kiiskeyga si ay uga baaraan haddii ay khiyaamo jirto. Haddii kaarka meelgaarka ah codsigan awgiis lagugu siiyo, kaarka caadiga ah marka laguu soo diro waa laguu xisaabin doonaa.

___________ Kiis kasta waxa lagu heli karaa oo keliya hal kaar oo ah QUEST meelgaar ah ilaa 12 bilood, marka laga reebo xaalado gaar ah. Kaarka QUEST meelgaarka ah ee aan ku helo codsigan awgiis waa la ii xisaabin karaa.

___________ Wax baa la ii diidi karaa, manaafacaadka FoodShare ayaan waayi karaa, ama lacag ayaa la igu ganaaxi karaa iyo/ama xabsi ayaan u geli karaa khiyaamada ama sharci-darrada aan u isticmaalo kaarka meelgaarka ah ee QUEST.

| **SAXIIXA** – Codsadaha | Saxiixa Taariikhda |
|---|---|
| | |

## Qeybta 4: Jawaabta – WAXBA HA KU QORIN XAFIISKA AYAA BUUXINAYA

The worker must complete this section before uploading this form to the electronic case file (ECF). A copy must be provided to the requester or household, if desired.

Was a temporary QUEST card provided because of this request?

☐ Yes

☐ No

| Worker CARES ID | Date |
|---|---|
| | |

Fursadaha xafiiskan waa kuwa ay dadku u siman yihiin.

MASAX FOOMKA